
# ISTICMAALIDA HYGROMETERKAAGA (QALABKA LAGU CABIRO QOYAANKA HAWADA)

**Hygrometer-ku wuxuu cabbiraa qoyaanka hawada. Wuxuu noqon karaa qaab waxtar leh oo lagu ogaado marka qoyaan badan uu ku jiro hawada gurigaaga. Qoyaanka badan ee hawada wuxuu samayn karaa uumi-biyood iyo uumi-biyoodkuna wuxuu sababi karaa samaysanka caaryo - inkasta oo aanay had iyo jeer ahayn sababta keliya ee ka dambaysa.**

Hygrometer-kaaga, garaaca yar waxa uu muujinayaa xadiga/caddadka qoyaanka hawada - oo loo cabbiro 'relative humidity' (RH) ahaan.

Isku day inaad garaacan ku ilaaliso aagga cagaaran. Midabka casaanka wuxuu dhigan yahay in qoyaan badan uu ka jiro hawada. Qoyaankaas wuxuu isku bedeli doonaa biyo marka uu ku dul dego sagxadaha qabow sida darbiyada iyo daaqadaha taasi waxayna u horseedi kartaa samaysanka caaryada.

Garaaca weyn wuxuu muujinayaa heerkulka. Bartilmaameedso aagga cagaaran. Heerkulka hawada oo hooseeya wuxuu hayn doonaa qoyaan yar taasoo la micno ah in biyo badan lagu sii deynayo derbiyada iyo daaqadaha.




**Garaaca qoyaanka hawada iyo garaaca heerkulka labaduba ku ilaali aagagga cagaarka ah si aad uga hortagto samaysanka uumi-biyoodka.**

## TALOOYINKA UGU SAREEYA

- Qalabka hygrometer-ka ku cabir qolal kala duwan wakhti ka waqti.
- Qolalka musqusha iyo jikooyinka ayaa ah meelaha ugu fiican ee marka ugu horeysay lagu cabiri karo.
- Fiiri saameynta hawo-siinta ee qol kasta ay ku yeelan karto heerarka qoyaanka hawada - haddii aad qabto marawaxada hawada banaanka u saarta ama daaqadaha duleelada leh, isticmaal.
- Si aad u hesho talooyin badan oo ku saabsan si loo yareeyo uumi-biyoodka gurigaaga, booqo www.curo-group.co.uk/condensation

**Haddii qoyaanka ama caaryada ay yihiin dhibaatooyin ka jira gurigaaga, fadlan noo soo sheeg. Wac 01225 366000 ama iimayl u dir enquiries@curo-group.co.uk. Waxaan qorshayn doonaa waqti aan ku soo booqano gurigaaga si aan kuu caawino.**

Qabso, lacagta iska bixi, oo xaqiiji - dhamayso wax walba adigoo isticmaalaya MyCuro
curo-group.co.uk/mycuro

Wada sheekeysi toos ah, Facebook, Twitter, iimaylka iyo qaar kaloo badan
curo-group.co.uk/contact

T: 01225 366000

**Haddii aad rabto in aad hesho macluumaadkan oo qaab kale ah fadlan nala soo xiriir.**




Maarso 2022